# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 09:57 AM** **Hansard No.19/1** **26/08/2012**

## Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 19[aad], waxaa ka qayb qaatey 9 mudane.

*Fadhigii 2[aad] ee Kal-fadhiga 19[aad]*

***Gudoomiyaha Md. Baashe Maxamed Faarax:-*** *waxaa aayado Quraana inoogu furaya Md. Obsiiye. – Mudanayaal waxaa shaley Golaha loo qeybiyay Ajendihii Kal-fadhiga 19a[ad], mantana waxaynu bilaabeynaa dooda Ajednaha sidaa darted waxaan mudanayaasha u sheegayaa inay* is qoraan mudanyaasha dooda xeerka ka qaybqaadanayaa Xoghayntuna soo qorto.

### Doodii Xeerka baananka Islaamiga ah.

1. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi (dable):-** Shirgudoonka iyo Mudanayaashu way salaamanyihiin, Gudoomiye ajendahahan laba arrimod baan doonayaa inaan ka hadlo, horta xeerk hoosaadkii kuma yaal ee halkiisii Xeerkii kootada dumarka ayaa lagu badalay, waayo sifo sharciya waa xeerhoosaadka kaliya ee dastuurka waa xeer Hoosaadka baarlamaanka Qodobka 35aad, hadaad tiraahdaan iska daaya waan iska deynba, tan labaad arrinta xeerka baanka ee soo noqnoqoneysa bangiga horta maaliyadu waa wax hadhaw dhbaato keeneysa aduunkii ilaahay shirkada la yidhaahdo African Online abaal bay wadanka ku leedahay, shirkada dahabshiil abaal bay wadanka kuleedahay, Jaraa'idka Jamhuuriyaha abaal bay wadanka ku leedahay.

***Waxaan ku darayaa Ajednaha:-***

- Xeer Hoosaadkii oo ah sharci horena ugu jirey
- Ninman badan oo halkan ka tagey baa Somalia tagey oo shirka muqdisho ka qaybgalay taas baarlamaanku Go'aan ha ka soo saaro.
- Males Zanawi dhimashadiisiina Baarlamaanku tacsi ha uga diro Baarlmaanka Itoobiya.
- Waxaa jira dhul aan leenahay oo Mapka Somalia lagu darey oo xagaa la raaciyay taasna aynu Go'aan ka soo saarno

***Waxaan ka saarayaa:-***

- Xeerka Kootada dumarka iyo dadka laga tirade badan yahay.

2. **Md. Cali Maxamed Aadan:-** Gudoomiye iyo mudanayaal horta waan idin salaamayaa anigu xeer hoosaadka waxaan odhan lahaa wuu fiicanyahay laakin siduu u kala muhiimsanyahay haloo soo kala horeysiiyo, ***waxaana leeyahay***:-

- Xeerka Kootada Haweenka oo madaxweynuhu inoo soo gudbiyay, la inaga sugayona maadaaama doorashadii dhowdahay markaa ama aan diidno ama aan ogolaanee, inagu waa inaan wajibkeena ka gudanaa madaama la inaga sugayo.
- Xeerka baananka Islaamiga ah isagana waan ogolahay laakiin Xeerka Hawlaha Baanankana oo ha la isu keeno labada xeeba.

Anigu inta kale Ajendaha waan waafaqsanahay sidan uu u qoran yahay waxaan leeyahay uun sida uu u kala muhiimsanyahay ha loo soo kala horeysiiyo

3. **Md. Saleeban Cawad Cali (Bukhari):-** marka hore waad salaamantihin, Ajendahan ***anigu laba qodobna waan ka saarayaa oo kala ah***:-

- Qodobka kowaad ee Warbixinta shirgudoonka, Gudidda joogtada iyo Gudiyada Golaha iyada waan ka saarayaa ajendaha sababtoo ah ma haysano wakhti aan ku dhameystirno hawlaha inoo yaal oodhan oo wakhtigey inaga qaadayaan warbixinadaasi markaa iyada meesha waa in laga saaraa.

- Xeerka Kootada Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay waan ka saarayaa sababtoo ah kootada loo xidhayo dadkaa meel ka dhac bay ku tahay shareecaduna ma ogola dadku isagoo siman buu dhashay halgan baa loo baahanhay, iyaga waxaa u fiican inay muujiyaan cududooda lagama tira badna, ha tartamaan haday maanta 1 mudane helaan, barito 10 mudanay helayaan, waa inay u halgamaan sidii doorkooda u qaadan lahaayeen oo halgan u galaan, hadiise kooto loogu xidho, wailgood halkaa dhaafimaayan oo waxay sugayaan wasx yar oo hadba la siiyo, waxaan u hambalyaynayaa hablaha badan ee is sharaxaya ee meel walba aad sawirkooda ku arkeyso. Wuxuu helay ***(secondment)***

***Waxaan kus oo darayaa ajendaha:-***

- Xeerka Hab Maamuuska Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka oo Gudidda dhaqaaluhu aanu gacanta ku hayno. Waad mahadsantihiin.

4. **Md. C/karim Aw Cali Shabeel:-** Gudoomiye iyo Mudanayaal waad salaamantihiin, anigu Ajendaha waxaan leeyahay ***ha laga saaro* :-**
    - Warbixinada oo ah qodobka 1aad, anigu waxaan ku raacsanahay Bukhaari in laga saaro ajendaha, waayo ajendaha ma dhameynayno, warbixinaduna wakhtigey inaga luminayaan, oo wakhti uma heyno.

    ***Waa in lagu soo daraa:-***

    - Maqnaasha Mudanayaasha, oo arrintaasi waxay u baahan tahay in lagu soo dabaalo, ma wanaagsana in 13 xildhibaan golihii fadhiyaan arrinkaa wax laga yidhaahdo.

- Xeer Hoosaadkii halug soo daro kuwii horena wuu ku jiray garan mayo sababta kan looga reebaye.
- Xeerka Caasimada isna halgu soo daro waa muhiim, mudana weynu haysanay, waana xeer aad loogu baahan yahay.
- Xeerka Kootada dumarka isaga waa in dastuurka lala eego wuxuu ka qabo, intaas ayaan ku soo koobayaa.

5. **Md. C/raxman Muuse Jaamac:-** Shirgudoonka iyo Mudanayaasha Marka hore waan idin salaamayaa, doodu waa waxaas ayaan ku darey iyo waxaas ayaan ka reebay in lagu soo koobo, ***Waxaan leeyahay ha lagu soo daro:-***

- Xeerka Caasimada sida Mudane C/kariim sheegay
- Xeerka Saxaafada isna muuhiima

***Hana laga saar:-***

- Xeerka kootada oo anagaa Somaliland ugu yar ana uma baahnin Kooto ina la xidho

6. **Md. Ibraahim Axmed Raygal:-** Shirgudoonka wad salaaman tihiin, waxaan leeyahay horta ajenduhu wuu fiican yahay sidan uu qoran yahay***, waa in lagu soo daraa:-***

- Xeerka dib u habeynta shuruucda
- Inaan wakhtiga aan haysano awooda saarno oo ku soo koobno 3 xeer dhameyno ilaa ansixintiisa kuwaas oo kala ah. 1. Xeerka Baanka dhexe iyo Hawlaha Baananka Ganacsiga oo la isu keeno, 2. Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka oo isna muhiima mudana in horyaaley.

3. Xeerka Maamul Wanaaga iyo La dagaalanka Musuqa, waayo Dhamaan Xeerarkaas waxaa ku qora Golaweynaha ayaa haya, markaa wixii Goleweynaha loo qeybiyay aynu u horeysiino.

- ***Warbixinada*** iyagu waa muqadimadii oo weynu baahanay, weyna wanaagsan tahay in muqadimo la ina siiyo, markaa isaga waa in loo daayaa sidiisaa

**7. Md. Axmed Maxamed Cabdi (kijandhe):-** Mudanayaal iyo Gudoomiyayaal waad salaaman tihiin, anigu waxaan leeyahay oo kaliya ***ha lagu soo daro:-***

**8.**

- Xeerka Saxaafada (media bill) waayo saxaafada khilaaf iyo muran badan baa ka jira, mudana wuu in horyaaley oo ajendayaashii hore wuu ku jirey waad mahadsantihiin.

**9. Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** marka hore waad salaamantihii Gudoomiye iyo Mudanayaal, anigu inta badan waxaa ka hadli lahaa waa la sheegay, waxaan jeclahay inaan mid ka hadlo.

- Warbixinada hadii laga saarayo waxaa jirta warbixin aan ka hayno Xaalada deegaanka oo meelo kala duwan tagney loona baahan yahay inaan Golaha siino markaa waxaan soo jeedinayaa hadiiba warbixinada laga saarayo in wakhti lanoo siiyo inaanu Warbixintadaa deegaanka Golaha siin oo lagu soo daro ajendaha.

- Tan labaad, arrinta shrike Somalia raad fara badan buu ku yeelanayaa dalka sidey wax u socdaan, oo nimankii ina heshiisiinayay ayaa wada inay Gobolada dalkeenii qaybiyaan oo somaliya qeyb ku daraan, markaa arrinkaana wax laga yidhaahd.

- Xeerka Baananka Islaamiga ah iyo kan hawlaha Ganacsiga baananka in la isla eego oo la isa soo raaciyona waan soo jeedinayaa.

- Kootada iyada kalmadii sh. Bukhaari ayaan ku raacsanahay ee duu soo jeediyay.s

10. **Md. C/qaadir Askar:-** anigu waxaan ku soo darayaa ajendaha
    - Xeerka ( shidaalka) Patroleum
    - Xeerka Macdanta iyo biyaha, labadaa xeer aad u mihiima dhaqaalaha inaga caawinaya iyo shaqa la'aanta.

***Waxaan ku raacsanahay*:-**

- Xeerka kootada saamiga haweenka waxaan taageersanahay in laga saaro sidii Md. C/raxman sheegay.
- Xisaab xidhada iyaga wakhtigoodii waa la dhaafey oo mudo Golaha lama keenin, markaa iyagana hadaan loo yeedhayn Hantidhowrihii halaga saaro.s

## Dhamaad.

**Gudoomiyaha:-** mudanayaasha dooda ka qeyb qaatey wey mahadsanyihiin iyo inta fadhiga ka soo xaadirtey doodii wey dhamaatey, hadal qoraalka ayaa soo ururinaya dooda sabtidana hadii ilaa yidhaahdo mudanayaasha fadhiga ka maqan ha ka soo xaadiraan fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada JSL**